

Faayrusyada Neefmareenka


(Respiratory Viruses)

Faayrusyada neefmareenka waxay sababi karaan hargab iyo ifilo. Adiga oo aqoon fiican u leh xanuunnadaas — oo sida ay u badan tahay ay kugu soo dhaceen hadda ka hor — intii aadan kala baran faayrusyada kala duwan ee aad ku xanuunsan karto. Qaar ka mid ah faayrusyada neefmareenka ee ay dadku ku xanuunssadaan waxaa ka mid ah:

- ◆ Ifilada
- ◆ Ifilada Kuleylaha
- ◆ Faayruska Hargabka
- ◆ Faayruska Neefmareenka iyo Sambabka (RSV)
- ◆ Faayruska Sanka
- ◆ Faayruska Mindhicirka
- ◆ Faayruska Karoonaha
- ◆ Faayruska Hargabka Qaboobaha

Sidee faayrusyadu ku faafaan?

Faayrusyada neefmareenka sida ugu badan ee la isku qaadsiiyo waa dhibco qoyan oo qof ka soo baxa oo soo gaara qof la jooga marka uu neefsado, hadlo, heeso, qufaco, ama hindhiso. Sida kale ee la isku qaadsiiyo waa in la is taabto (sida dhunkashada ama salaan gacanta ah) ee qofka xanuunsan ama meel xanuunku gaaray, oo ka dibna la taabto afka, sanka, ama indhaha. Faayrusyadu meelaha ay gaaraan waxay ku noolaadaan saacado badan.




Sidee baad isu difaaci kartaa si aadan u xanuunsan?

- ✓ Ka fogow oo ha u dhawaan dadka xanuunsan.
- ✓ Badanaa waa in aad gacmaha dhaqato ugu yaraan 20 ilbiriqsi.
- ✓ Ha taaban wejigaaga (gaar ahaan afka, sanka, iyo indhaha).
- ✓ Afka iyo sanka daboolo markaad sameyso qufac ama hindhiso.
- ✓ Meel kasta iyo alaabta si joogto ah jeermiska uga nadiifi (sida meelaha albaabka laga furo, miisaska, iyo meelaha nalalka laga shido).



Dadkee baa khatar weyn ugu jira in ay aad u xanuunsadaan?

In kasta oo ay dadka badankoodu isku arki karaan calaamado ah faayruska neefmareenka, haddana dadka qaarkood baa aad ugu xanuunsada ama u dhinta. Dadka uu difaacoodu yahay daciifka, dhallaanka, waayeelka, iyo dadka qaba xanuun ka haya sambabbada ama wadnaha ayaa khatar weyn ugu jira in ay faayruskan aad ugu xanuunsadaan.



Calaamadaha ugu Badan Faayrusyada Neefmareenka:

- ◆ Cune-xanuun
- ◆ Qufac
- ◆ Qandho
- ◆ Daal
- ◆ Cabbursanaan iyo biyo sanka ka yimaada
- ◆ Hindhiso
- ◆ Madax-xanuun
- ◆ Jir-xanuun

Faayrusyada Neefmareenka

Baro noocyada kala duwan ee faayrusyada neefmareenka.

Faayruska Hargabka

Waxaa jira in ka badan 50 nooc oo ah faayrusyada hargabka oo ku dhaca dadka.

Calaamadaha: Hargabka neefmareenka caadiga ah ka sokow, faayruska noocan ah wuxuu keenaa shuban, daaf, kaadi-haysta oo bararta, iyo xanuun ku dhaca caloosha/mindhicirka.

Xanuun-helidda: Waxa faayruskan heli kara shaqaalaha caafimaadka oo isticmaalaya baaris iyo sheybaar.

Xilliyada: Qabooha iyo horraanta guga

Ka-hortegidda: Dadka xanuunkan qaba in aan lagu dhawaan, in gacmaha la dhaqdo, iyo in meelaha badanaa la taabto jeermiska laga dilo.

Faayruska-karoonaha, Faayruska-sanka & Faayruska-caloosha

- ♦ Waxaa jira toddoba nooc oo ah karoono-faayrus oo dadka ku dhici kara. Mararka qaarkood karoono-faayruska ku dhaca xayawaanka ayaa is beddela oo dadka ku sii dhaca, oo wuxuu noqdaa nooca dadka oo cusub. Waxaa jira afar nooc oo ah karoono-faayrus xilliyeed oo kala ah HKU1, NL63, 229E, iyo OC43. **COVID-19 waa nooc ah karoono faayrus gaar ah (oo la yiraahdo karoono faayruska cusub) oo wuxuu ka khatar badan yahay karoono faayruska la arko xilliyada qaarkood.**
- ♦ Waxaa jira in ka badan 100 nooc oo ah faayrusyada sanka oo ku dhaca dadka. Hargabka caadiga ah 50% waxaa sababa nooc ka mid ah faayruska sanka.
- ♦ Waxaa jira in ka badan 100 nooc oo ah faayruska caloosha oo ku dhaca dadka. Laba nooc oo si gaar ah khatar u leh waxaa la yiraahdaa [EV-D68](#) iyo [EV-A71](#).

Calaamadaha: Faayrusyada waxay dadku u haystaan in ay sababaan hargabka caadiga ah. Calaamadaha waxaa ka mid ah calaamado guud oo ku qoran Bogga 1aad.

Xanuun-helidda: Baarista sababta loo sameynayo waa calaamadaha. Baarista sheybaarka si joogto ah looma sameeyo sababtoo ah natiijadu ma saameyneyso daaweynta.

Xilliyada:

- ♦ **Karoono-faayrusyada:** Qaboobaha
- ♦ **Faayruska-sanka/Faayruska-caloosha:** Guga iyo xagaaga

Ka-hortegidda: Sida ugu fiican ee looga hortagi karo in lagu xanuunsado COVID-19 waa in loo qaato tallaalka COVID-19 ee ugu dambeeyey ee sannad kasta. Dadka faayruskan qaba in aan lagu dhawaan, in gacmaha la dhaqdo, iyo in meelaha la taabto jeermiska laga dilo.

Faayrusyada Neefmareenka

Baro noocyada kala duwan ee faayrusyada neefmareenka.

Faayrusyada Ifilada (fuluuga)

Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan oo ah faayrusyada ifilada oo is beddela muddo ka dib, sababtaas awgeed ayaa sannad kasta loo qaataa tallaalka fuluuga. Waxaa jira laba nooc oo waaweyn oo ah faayruska ifilada oo xanuun noqda bilaha qabowgu socdo—nooca A iyo B.

Calaamadaha: Calaamadaha waxaa ka mid ah gebi ahaan kuwa ku qoran Bogga 1aad.

Xanuun-helidda: Baarista sheybaarka ayaa lagu garanayaa haddii aad qabto ifilada. Inkasta oo aysan xanuun-helidda degdegga ah u fiicneyn sida nooca PCR, haddana waxaa jawaabtooda lagu heli karaa 30 daqiiqo ama in ka yar.

Daaweynta: Daawada faayruskan (sida Tamiflu) ayaa ah wax la heli karo oo yareyn kara calaamadaha, wakhtiga xanuunku jirayo, ka-hortegidda dhib daran, iyo joojinta faafinta fuluuga. Waxay si fiican ula shaqeeyaan calaamadaha bilowga ah marka loo qaato 48 saac gudahood.

Xilliyada: Deyrta iyo qaboobaha

Ka-hortegidda: Sida ugu habboon ee looga hortago in uu kugu dhaco fuluu waa in la qaato tallaalka fuluuga kaa celinaya ee sannad kasta. Intaas waxaa sii dheer, dadka faayruskan qaba in aan lagu dhawaan, in gacmaha la dhaqdo, iyo in meelaha la taabto jeermiska laga dilo.

Faayruska Hargabka Qaboobaha

Waxaa jira afar nooc oo ah faayrusyo ifilo oo qaboobaha sababa xanuunnada neefmareenka. Waxaa badanaa laga helaa carruurta yaryar, waayeelka, iyo dadka uu daciifo habdhiska difaaca jirkooda.

Calaamadaha: Calaamadaha waxaa ka mid ah gebi ahaan kuwa ku qoran Bogga 1aad.

Xanuun-helidda: Faayruska hargabka qaboobaha waxaa dadka ka heli kara shaqaalaha caafimaadka oo isticmaalaya baaris iyo sheybaar.

Xilliyada: Dabyaaqada Qabooha iyo horraanta guga

Ka-hortegidda: Dadka xanuunkan qaba in aan lagu dhawaan, in gacmaha la dhaqdo, iyo in meelaha badanaa la taabto jeermiska laga dilo.

Faayruska Ifilada Kuleylaha

Waxaa jira afar nooc oo ah faayrusyada ifilada kuleylaha oo sababa xanuunnada neefmareenka. Waxay badanaa ku dhacaan dhallaanka iyo carruurta yaryar, in kasta oo ay ku dhici karaan dadka oo dhan.

Calaamadaha: Calaamadaha waxaa ka mid ah gebi ahaan kuwa ku qoran Bogga 1aad.

Xanuun-helidda: Faayruska kuleylaha waxa heli kara shaqaalaha caafimaadka oo isticmaalaya baaris iyo sheybaar.

Xilliyada: [Noociisa ayuu ku xiran yahay](#), deyrta, guga iyo horraanta xagaa.

Ka-hortegidda: Dadka xanuunkan qaba in aan lagu dhawaan, in gacmaha la dhaqdo, iyo in meelaha badanaa la taabto jeermiska laga dilo.

Faayruska Neefmareenka iyo Sambabka (RSV)

Calaamadaha: In kastoo dadka uu ku dhaco xanuunka RSV isku arkaan calaamado fudud, mararka uu ugu daran yahay, naqaska oo ku adkaada ayaa dadka ku keeni kara in isbitaal loo seexiyo, gaar ahaan dhallaanka iyo waayeelka.

Xanuun-helidda: Sheybaarka in lagu soo helo badanaa **lama** sameeyo, laakiin waxaa jira baaris badan oo lagu soo sameeyo sheybaarrada Wisconsin.

Xilliyada: Deyrta iyo qaboobaha

Ka-hortegidda: [Palivizumab](#), waa daawo, looga hortago si aysan si daran ugu xanuunsan dadka khatarta ku jira. Tallaallo ayaa loo hayaa waayeelka si looga difaaco inay aad ugu xanuunsadaan RSV. Tallaallo loogu talagalay haweenka uurka leh ama difaac ayaa loo hayaa si dhallaanka iyo carruurta yaryar looga difaaco inay aad ugu xanuunsadaan RSV. Intaas waxaa sii dheer, dadka faayruskan qaba in aan lagu dhawaan, in gacmaha la dhaqdo, iyo in meelaha la taabto jeermiska laga dilo.